DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 20AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 8/25/20 | Lam. 02 |
|---|---|---|---|

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

# SHARCIGA MAARAYNTA DHULKA MAGAALOOYINKA DOWLADDA PUNTLAND

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah* **Sharciga Maaraynta Dhulka Magaalooyinka Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتـب
الـرئيـس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 1 ee August 25, 2020, kuna saabsan sharciga Maaraynta Dhulka Magaalooyinka Puntland**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/85/2020, kuna taariikhaysan August 22, 2020.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeeyn **Xeerka sharciga Maaraynta Dhulka Magaalooyinka Puntland.**

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**
**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

***Tix:-*** **XGGW/DPL/85/2020** **Garoowe, Sabti ,** **Taariikh:-** **22/08/2020**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Maareynta Dhulka Magaalooyinka Puntland**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-**aad.**

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref:MW/DPS/MW/ 193/2019 ee July, 15, 2019 kuna saabsanaa Ansixinta Xeerka Maareynta Dhulka Magaalooyinka Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Maareynta Dhulka Magaalooyinka Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY:-** Dooddii iyo go'aankiii Golaha Wakiilladu ku Ansixiyey kalfadhiga 46-aad Fadhigiisii 17-aad ee **13/07/2020** Xeerka Maareynta Dhulka Magaalooyinka Puntland oo ay goob joog ahaayeen 41 Mudane.

**MARKUU ARKAY:-** Go'aankii Golaha Wakiilladu ay cod aqlabiyad ah (40) Mudane oo gacan taag ah ku ansixiyeen Xeerka Maareynta Dhulka Magaalooyinka Puntland, halka aysan jirin mudane diidey, kana aamusay (1) mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Maareynta Dhulka Magaalooyinka Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

## DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

### GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# XEERKA MAARAYNTA DHULKA MAGAALOOYINKA PUNTLAND

### GAROOWE, LUULYO, 2020

# TUSMADA

**BOGGA**

CUTUBKA 1-aad ........ 1
QODOBO GUUD ........ 1
Qodobka 1-aad ........ 1
Erey Bixin ........ 1
Qodobka 2-aad ........ 2
Magaca Xeerka ........ 2
Qodobka 3-aad ........ 2
Baaxadda Xeerka ........ 2
Qodobka 4-aad ........ 2
Ujeeddada Xeerka ........ 2
Qodobka 5-aad ........ 2
Mabaadi'da Maamulka Dhulka Magaalooyinka. ........ 2
CUTUBKA 2-aad ........ 3
WAAJIBAADKA IYO AWOODAHA HAY'ADAHA DAWLADDA EE LA XIRIIRA MAAMULKA DHULKA MAGAALOOYINKA ........ 3
Qodobka 6-aad ........ 3
Waajibaadka Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta ........ 3
Qodobka 7-aad ........ 4
Waajibaadka Dawladda Hoose Ee Dhulka Magaalooyinka ........ 4
Qodobka 8-aad ........ 5
Xaddidaadda Awoodda Dawladaha Hoose Ee La xiriira Dhulka ........ 5
CUTUBKA 3-aad ........ 5
QORSHAHA IYO QOONDAYNTA DHULKA MAGAALOOYINKA. ........ 5
Qodobka 9-aad ........ 5
Qoondaynta Dhulka Gaarka Loo Leeyahay, Oggolaanshaha Isticmaalka Dhulka, Diiwaan-Gelinta iyo Habka Kala Wareejinta. ........ 5
Qodobka 10-aad ........ 6
Naqshadda Guud Ee Magaalooyinka ........ 6
Qodobka 11-aad ........ 6
Kala Saaridda Dhulka Dawladda iyo Dhulka Gaarka loo leeyahay ........ 6
Qodobka 12-aad ........ 7
Kala-Xadaynta Dhulka ........ 7
Qodobka 13-aad ........ 7
Noocyada Loo Qaybinayo Dhulka La bixinayo. ........ 7
Qodobka 14-aad ........ 8
U-wareejinta Dhulka Dawladda Lahaansho Gaar Ahaaneed ........ 8
Qodobka 15-aad ........ 8
Ilaalinta Dadka Barakacayaasha ah iyo Kuwa Saboolka Ah. ........ 8
Qodobka 16-aad ........ 9
Hab-Raaca Dhul Ama Guri Ka Saarista Sharciga Ah. ........ 9
Qodobka 17-aad ........ 9
Kiraynta Isticmaalka Dhulka Dawladda ........ 9
Qodobka 18-aad ........ 10
Dib-U-Habaynta Dhisme Dawladeed Oo Ku Yaal Dhul Dawladeed Oo Kiraysan. ........ 10



GARYADAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 19-aad ........ 10
Shuruudaha Curfiga Ah (Lagu Dhaqmayo) Ee U Dhexeeya Kireeyaha iyo Kiraystaha. ........ 10
Qodobka 20-aad ........ 11
Horumarinta Dhulka Dawladda Ee La Kireeyo. ........ 11
Qodobka 21-aad ........ 11
Ganaaxa Iska Bixin La'aanta Kirada Dhulka. ........ 11
Qodobka 22-aad ........ 11
Hannaanka Dhulka Loogu Qoondaynayo Hay'adaha Dawladda ........ 11
Qodobka 23-aad ........ 12
Habka Lahaanshaha iyo Helidda Dhulka Gaarka Ah. ........ 12
Qodobka 24-aad ........ 13
Mudadda Lahaanshaha Dhulka ........ 13
Qodobka 25-aad ........ 13
Ula Wareegidda Jago Dhul Sabab Dan-Guud Ah ........ 13
Qodobka 26-aad ........ 14
Iibka Boos Bannaan ........ 14
Qodobka 27-aad ........ 14
Naadada Boos Leh Isticmaal Rasmi Ah. ........ 14
Qodobka 28-aad ........ 14
Diiwangelinta Dhulka ........ 14
Qodobka 29-aad ........ 15
Diiwaangelinta Dhulka ee Casriga Ah ........ 15
Qodobka 30-aad ........ 15
Badbaadada Dhulka Lagu Diiwaangasho Habka Elektarooniga Ah ........ 15
Qodobka 31-aad ........ 15
Habka Qaybinta Dhulka ........ 15
Qodobka 32-aad ........ 15
Waajibaadka Qofka Boos La Siiyo ........ 15
Qodobka 33-aad ........ 16
Dhisme Sharci Darro Ah ........ 16
Qodobka 34-aad ........ 16
Rarista iyo Duminta Dhisme Sharci Darro ah ........ 16
Qodobka 35-aad ........ 16
Duminta Dhisme Sharci ah ........ 16
Qodobka 36-aad ........ 17
Joojinta Dhismaha ........ 17
CUTUBKA 4-aad ........ 17
CASHUURTA DHULKA IYO DAKHLIGA KALE ........ 17
Qodobka 37-aad ........ 17
Dakhliga Ka Soo Xerooda Tacaamulaadka La Xiriira Dhulka ........ 17
Qodobka38-aad ........ 17
Cashuur Sannadeedka Hantida ........ 17
Qodobka 39-aad ........ 18
Iibka Dhulka Iyo Cashuurta Kala Wareejinta ........ 18
Qodobka 40-aad ........ 18
Kirada Dhulka Dawladda ........ 18
Qodobka 41-aad ........ 18
Khidmadaha Adeega iyo Ujrooyinka ........ 18



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 42-aad ..................... 18
Khidmadda Laga Qaado Ruqsadda Oggolaanshaha Dhismaha Ganacsiga ..................... 18
Gaarka Loo Leeyahay ..................... 18
Qodobka 43-aad ..................... 19
La Fakashada Cashuurta Dhulka ..................... 19
CUTUBKA 5-aad ..................... 19
MAARAYNTA KHILAAFAADKA DHULKA ..................... 19
Qodobka 44-aad ..................... 19
Xallinta Khilaafaadka Dhulka ..................... 19
Qodobka 45-aad ..................... 20
Nooca Dacwadda Dhulka ..................... 20
CUTUBKA 6-aad ..................... 20
CIQAABAHA ..................... 20
Qodobka 46-aad ..................... 20
Ciqaabaha ..................... 20
Qodobka 47-aad ..................... 20
Dhaqangelinta Xeerka Ciqaabta ..................... 20
Qodobka 48-aad ..................... 20
Go'aanka Joojinta Dhismaha Si Ku-Meel-gaar Ah ..................... 20
Qodobka 49-aad ..................... 21
Ciqaabaha Ka Dhalanaya Ku Takrifalka Awoodda ..................... 21
CUTUBKA 7-aad ..................... 21
QODOBO QUBANE AH ..................... 21
Qodobka 50-aad ..................... 21
Shirkadaha Hantida Maguurtada Ah iyo Dullaalada Iibka Dhulka iyo Kala Wareejinta ..................... 21
Qodobka 51-aad ..................... 21
Waajibka Ka Saaran Dullaalka Inuu Hubiyo Iibka Dhulka ..................... 21
Qodobka 52-aad ..................... 22
Nootaayooyinka Dadwaynaha Ee Ka Shaqeeya Tacaamulaadka Dhulka ..................... 22
Qodobka 53-aad ..................... 22
Waajibaadka Dammiinul-Maalka Dhulka La Isku Qabsado ..................... 22
Qodobka 54-aad ..................... 22
Soo Saarista Xeer-Nidaamiyeyaal ..................... 22
Qodobka 55-aad ..................... 23
Burin ..................... 23
Qodobka 56-aad ..................... 23
Dhaqangalka Xeerkan ..................... 23




GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## CUTUBKA 1-aad

## QODOBO GUUD

### Qodobka 1-aad

### Erey Bixin

**"Xeer"** Waxaa loola jeedaa xeerka maaraynta dhulka magaalooyinka Puntland.

**"Dawlad"** Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed.

**"Dastuurka"** Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee la ansixiyay 2012.

**"Wasaarad"** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta.

**"Wasiir"** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta.

**"Dhul"** Waxaa loola jeedaa dhulka magaalooyinka Puntland.

**"Lahaansho"** Waxaa loola jeedaa xuquuq ku xaddidan sida sharcigu qabo inaad haysato, degto iyo in aad u isticmaasho dhulka si joogto ah.

**"Diiwaangelin"** Waxaa loola jeedaa habraac qeexaya, gabal dhul ah oo caddaynaysa cidda xilligan leh habka lahaanshaha iyo xuquuqda kale ee lagu diiwaangeliyey, iyadoo loo cuskanayo xeerkan ama xeerar kale oo khuseeya diiwaangelinta.

**"Mulkiyad dhammaystiran"** Waxaaa loola jeedaa lahaansho dhul si abadi ah oo ay weheliso xuquuqda wareejinta, kireynta iyo hibaynta dhulkaas.

**"Dhul bulsho"** Waxaa loola jeedaa dhul ay leeyihiin koox dad ah oo ay ka dhaxayso xiriir qoysnimo, deegaan ama waxyaabo kale oo isku dabraya.

**"Dhexdhexaadin"** Waxaa loola jeedaa hab lagu xallinayo khilaafaadka dhex mara laba daraf ama in ka badan oo ku kulma dhul, ama isku daya in lagu xalliyo iyadoo la adeegsanayo dhex-dhexaadiye.

**"Xeerka Ciqaabta Guud"** Waxaa loola jeedaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed Lr.5 ee 1962.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Maaraynta dhulka magaalooyinka Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan dhulka magaalooyinka Dawladda Puntland.

## Qodobka 4-aad
## Ujeeddada Xeerka

1. Ujeeddooyinka Xeerkan waa inuu: -

    b) Fududeeyo helidda nidaam taabo gal ah oo lagu maamulo dhulka magaalooyinka Dawladda Puntland.

    t) Horumarinta habka isku dhafan ee qorshaynta dhulka magaalooyinka,dhiirigelinta isticmaal waara ee dhulka iyo ilaalinta xuquuqda shakhsiga ee dhulka.

    j) Maamulidda iyo nidaaminta hantida, goobaha dadweynaha iyo ka hor-tagidda ku takrifalka isticmaalka dhulka.

    x) Is-waafajinta waajibaadka iyo awoodaha hay'adaha dawliga ah iyo yareynta maamul-xumada la xiriirta dhulka magaalooyinka.

    kh) Ka hor-tagidda iyo maareynta khilaafaadka dhulka iyada oo la dhisayo hannaan dawli ah oo xalliya khilaafaadka dhulka.

    d) Fududaynta dib-u-dejinta dadka barakacayaasha ah.

    r) Kor u qaadidda aaminaadda dadweynaha ku qabaan maamulka iyo xakamaynta dhul-boobka.

## Qodobka 5-aad
## Mabaadi'da Maamulka Dhulka Magaalooyinka.

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dhul helo, hanti yeesho si waafaqsan qodobka 17-aad farqadiisa 4-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland oo sheegaya "qofna lagama qaadi karo khidmad/kharash hantidiisana lalama wareegi karo, iyadoo aan loo cuskan sababo sharciga waafaqsan".
2. Dhulka Puntland (Awoodda ilaahay ka sokow) waxaa iska leh dawladda, qofna dhul ma yeelan karo rasmi ahaan haddii aan mulkiyad laga haysan hay'adaha awoodda u leh ee dawladda.
3. Dhammaan hay'adaha fulinta iyo garsoorka ee adeegsanaya ama fasiraya awoodaha ku xusan xeerkan waan in ay xaqiijiyaan:-

    b) Siinta, ilaalinta xuquuqaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee shakhsiyaadka.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

t) Ilaalinta xuquuqda shakhsiyaadka ee dhulka, guryaha iyo hantida, adeegsiga awood sharci darro ah, barakicinta iyo raridda khasabka ah.

j) Ka qayb-gelinta bulshada arrimaha la xiriira horumarinta qorshayaasha magaalooyinka, gaar ahaan dadka ay saamaynta ku yeelanayso.

x) Fududaynta hab-raacyada dawladda hoose ee la xiriira qorshaynta, diiwaan gelinta, kala wareejinta iyo cashuurida xuquuqda dhulka.

kh) Fududaynta maalgashiga iyada oo aan lagu xad-gudbayn xuquuqda mulkiyadda, goobaha dadwaynaha, deegaanka iyo isticmaalka dadka ee hantidooda.

d) Yaraynta suurto-galnimada ku takrifalka awoodaha iyo maareynta dhulka ee saraakiisha iyo shaqaalaha dawladda hoose.

r) Fududaynta wada xaajood lala yeesho dadka ay saamaynta ku yeelato tallaabooyinka maaraynta iyo qorshaynta dhulka iyadoo la siinayo mag-dhow caddaalad ku salaysan.

s) Xaqiijinta u sinnaanta helista dhulka iyadoo aan qofna lagu takoorin sinjiga, lab iyo dhedig midkii uu yahay, diinta uu aaminsan yahay, qabiilka uu ka tirsan yahay iyo mabda'a siyaasadeed ee uu aaminsan yahay ama xaaladiisa dhaqan-dhaqaale.

sh) Qof kasta oo barakace ah iyo dadka dhaqaale ahaan u tabar daran waxay xaq u leeyahiin inay helaan dhul ay degaan, beertaan, daaq u isticmaalaan iyo dhaqaale abuur, si la mid ah muwaadiniinta kale ee ku nool deegaankaas.

4) Xuquuqda dhulka ee lagu haysto hab-dhaqameed waa in la xaqiijiyaa sugnaanta cidda haysata ha ahaado qof ama koox, markii ay sugnaato waxay helayaan aqoonsi sharci ah.

## CUTUBKA 2-aad

## WAAJIBAADKA IYO AWOODAHA HAY'ADAHA DAWLADDA EE LA XIRIIRA MAAMULKA DHULKA MAGAALOOYINKA

### Qodobka 6-aad

### Waajibaadka Wasaaradda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Guriyeynta

1. Iyadoo aan wax loo dhimayn qodobada ka hadlaya shaqooyinka iyo mas'uuliyadaha gaarka ah ee la siiyay hay'ad kale, Wasaaraddu waxay u-xilsaaran-tahay;
   b) Kor-u-qaadidda aqoonta farsamo iyo maamul ee degmooyinka.
   t) Dejinta iyo daadajinta qorshayaasha, xeerarka, xeer-nidaamiyeyaasha iyo halbeegyada lagu maamulayo dhulka magalooyinka.
   j) Dejinta naqshadaha guud ee magaalooyinka.
   x) Dejinta hannaanka lagu kala saarayo dhulka magaalooyinka.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

kh) Ilaalinta dhulka dawladdu leedahay, iyadoo iskaashi kala samaynaysa hay'adaha kale ee dawladda si loo helo dhul marka loo baahdo in laga dhiso xarumo cusub ama la ballaariyo, hadba heerka baahidu gaarsiisantahay.

d) Uga warbixinta xukuumadda dhulka magaalooyinka, arrimaha qorshaynta iyo wixii ku takrifal awood xafiis ah, hab-dhaqan musuqmaasuq ah oo ay ku kacaan madaxda dawladaha hoose iyo soo jeedinta tallaabooyinka maamul iyo anshax-marineed ee laga qaadayo.

r) Dacwad ka gudbinta madaxda fulinta dawladaha hoose haddii ay jebiyaan xeerarka iyo qorshayaasha u degsan maamulka dhulka magaalooyinka.

s) Is-waafajinta iyo midaynta habka maamulka magaalooyinka dhulka Puntland.

sh) Diiwaangelinta iyo kaydinta dhulka ay degan yihiin hay'adaha dawladda iyo dhulka kaydka u ah danta guud.

## Qodobka 7-aad

## Waajibaadka Dawladda Hoose Ee Dhulka Magaalooyinka

1) Awoodaha Dawladda Hoose ee Maamulka Dhulka Magaalooyinka waa: -

b) Qoondaynta iyo bixinta dhulka iyada oo raacaysa qorshaha naqshadaynta ee ay soo saarto Wasaaraddu.

t) Diiwaangelinta iyo kaydinta qoraalada lahaanshaha dhulka sida gaarka ah loo leeyahay ee lagu mulkiyey;-

i. Bixinta dhulka ku yaal goobaha la degan yahay iyo kuwa lagu ganacsado.
ii. Iibka dhulka sharci ahaan loo leeyahay.
iii. Kala xukumidda dhul la isku qabsaday iyadoo loo marayo habka dhex-dhexaadinta iyo go'aan ka gaarista maxkamadda awoodda u leh.
iv. Gacan ku hayn muddo dheer iyada oo aan cid gaar ah ama dawladi ku qabsan.
v. Barnaamijyada dib-u-dejinta.
vi. Kala dhaxlidda, isu dar-daaranka iyo dhulka la isu siiyo hab kale oo sharci ah.

j) Samaynta nidaam la isku hallayn karo oo loo kaydiyo xogta dhulka magalooyinka iyo hantida ma guurtada ah oo ay ka mid yihiin goobaha sida gaarka ah loo leeyahay iyo kuwa dawladdu leedahay.

x) U soo jeedinta Wasaaradda wixii qorshe ah ee lagu horumarinayo dhulka iyo dib-u-habayntiisa iyadoo uu la socdo;

i. Ujeedka laga leeyahay qorshaha cusub.
ii. Dhulka hindisaha qorshayntu koobayo (saamayn karo).
iii. Sababta ka dambaysa cayimidda goobta hindisuhu khuseeyo.
iv. Himilooyinka guud ee laga leeyahay horumarinta dhulka magaalooyinka.

kh) Soo saarista rukhsadaha dhismayaasha ee dhulka gaarka loo leeyahay, iyada oo la hirgelinayo halbeegyada sahanka iyo xeer-nidaamiyeyaasha u degsan Wasaaradda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

d) Sixidda iyo xallinta khilaafaadka farsamo ee ka dhasha dhulka iyo qaadashada tallaabooyinka maamul iyo anshax-marineed ee ka dhan ah shaqaalaha ku lug leh khilaafka, ka warbixinta nooca khilaafka iyo soo ban-dhigidda tallaabooyin sixitaan si loo hagaajiyo wixii dul-duleel ah ee la arkay ama la soo sheegay.

r) Hirgelinta lambarinta dhulka iyo guryaha gaarka loo leeyahay iyo daryeelka dhismayaasha dawladda hoose leedahay.

2) Qoondaynta dhul laga hirgelin karo mashaariic maalgashi iyo kuwa horumarineed haddii markaas uu waafaqsan yahay naqshadda magaalada, la tashina lagala sameeyo Wasaaradda.

## Qodobka 8-aad

## Xaddidaadda Awoodda Dawladaha Hoose Ee La xiriira Dhulka

1) Dawladda Hoose ma qoondayn ama bixin karto dhul loo asteeyey hawlo la xiriira macdan qodis, duulista hawada, xeryo ciidan, goobaha dhaqanka, taariikhda, beeraha, dhulka daaqsinka ah, xeebaha iyo dhul kasta oo dabeecad ahaan ama sharci ahaan soo hoos galaya awoodda Wasaaradda.

2) Iyadoo laga duulayo yaraynta masiibooyinka, ka hor-tagga daadadka iyo fatahaadaha, togagga dabiiciga ah iyo biyo-mareennada looma adeegsan karo dhisme ama hawlo kale oo la xiriira.

## CUTUBKA 3-aad

## QORSHAHA IYO QOONDAYNTA DHULKA MAGAALOOYINKA.

## Qodobka 9-aad

## Qoondaynta Dhulka Gaarka Loo Leeyahay, Oggolaanshaha Isticmaalka Dhulka, Diiwaan-Gelinta iyo Habka Kala Wareejinta.

1) Dhul kasta oo la qoondaynayo waa in uu waafaqsan yahay qorshaha magaalada ee la ansixiyay, haddiise markaas aanu jirin ama aan la ansixin qorshe magaalo waa in qoondaynta dhulku waafaqsan yahay ujeeddooyinka horumarineed ee ay dawladda hoose ka leedahay goobta.

2) Dawladda Hoose waa inay leedahay halbeegyo iyo hannaan isku mid ah oo lagu shaqeeyo, laguna maamulo qoondaynta, diiwaangelinta, isticmaalka iyo kala wareejinta dhulka gaarka loo leeyahay, iyadoo la adeegsanayo xeer-nidaamiyaha magaalooyinka Puntland ama shax iyo jaantusyo kale oo lagu soo saaro digreeto ama amar Wasaaradeed.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 10-aad

## Naqshadda Guud Ee Magaalooyinka

1. Wasaaradda oo la tashanaysa hay'adaha kale ee dowladda iyo qaybaha kala duwan ee bulshada ayaa dejinaysa naqshadda guud ee magaalooyinka iyada oo lagu muujinayo:-
   b)Dhulka deegaaanka noqonaya.
   t) Dhulka Warshadaha noqonaya.
   J) Dhulka ganacsiga noqonaya.
   x) Dhulka nasashada dadwaynaha noqonaya.
   kh) Dhulka waddooyinka noqonaya.
   d) Dhulka loogu tala galay dhigashada baabuurta.
   r) Dhulka loogu tala galay qabuuraha.
   s) Dhulka laga dhisayo xarumaha caafimaadka.
   sh) Dhulka laga dhisayo goobaha waxbaarshada.
   dh) Dhulka laga dhisayo masaajidda iyo daryeelka dadka nugul.
   c) Dhulka laga dhisayo xarumaha dawladda.
   g) Dhulka loo qoondeeyay xarumaha ciidamada.
   f) Dhulka loo asteeyay garoomada ciyaaraha.
   q) Dhulka ay marayaan xarkaha korontadada, isgaarsiinta, bullaacadaha iyo tuubooyinka biyaha.
   k) Dhulka loo ilaaliyo bilic ama ilaalin deegaan darteed.
   l) Iyo dhulka looga maarmi waayo horumarinta magaalada iyo danta guud.
2. Waxaa waajib ah in dhul kasta oo la qoondaynayo ama la naqshadaynayo laga jaro 30% oo loo qoondeeyo danta guud.
3. Naqshadda guud ee ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan waxaa digreeto ku soo saaraya Wasiirka.

## Qodobka 11-aad

## Kala Saaridda Dhulka Dawladda iyo Dhulka Gaarka loo leeyahay

Dhulka magaalooyinka waxa loo kala saarayaa, dhul Dowladeed iyo dhul gaar loo leeyahay.

B) Dhulka magaalooyinka ee Dowladdu leedahay waa;

i. Dhulka ay si sharci ah u leedahay, u isticmaashay ama ula wareegtey hay'ad dawladeed.
ii. Dhul kasta oo hab kiro ah ay ku degan tahay hay'ad aan dawli ahayn.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

iii. Dawladdu iibsatay ama la wareegtay.
iv. Aan sharci ahaan cid leh la ogayn.
v. Aan cid sharci ahaan u dhaxasha la ogayn.
vi. Dhul kasta oo ku fadhiya xarumaha adeegyada dadwaynaha, dan guud loo adeegsado.
vii. Dhul kasta oo ku dhexyaalla magaalada oo aan cid si gaar ah u leh la ogayn.

T) Dhulka gaarka loo leeyahay:-
Dhulka magaalooyinka ee gaarka loo leeyahay waa dhul si sharci ah loo qoondeeyay, loo iibsaday, loogu wareejiyay, loogu mulkiyay, ku haysto qof shacab ah ama qoys degan dhulka magaalada si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 12-aad
## Kala-Xadaynta Dhulka

1. Dhulka waxaa loo kala saarayaa afar (4) qaybood oo kala ah:
   b) Dhul daaqsimeed.
   t) Dhul-beereed.
   j) Dhul xeebeed.
   x) Dhul deegaan magaalo.
2. Si loo ilaaliyo dhul daaqsimeedka loogana hor-tago nabaad-guurka, magaalooyin, barkadaha, ceelal iyo waro cusub meel hor leh lagama samayn karo haddii aan ruqsad laga haysan Wasaaradda.
3. Dhul daaqsimeedka, beeraha iyo xeebaha waxaa lagu maamulayaa xeer gaar ah.

## Qodobka 13-aad
## Noocyada Loo Qaybinayo Dhulka La bixinayo

1. Dhulka ay bixinayso maamulka Dawladaha Hoose oo loogu talo galay degsiimada magaalada wuxuu u qaybsamayaa laba nooc.
   b) Jago leh isticmaal rasmi ah.
   t) Jago leh isticmaal ku meel-gaar ah sida, dhul loo qoondeeyey deegaan aan rasmi ahayn.
2. Marka dhul isticmaal ku-meel-gaarka ah loo bedelo dhul leh isticmaal rasmi ah, waxaa mudnaanta lahaanshaha/isticmaalka la siinayaa ciddii ku deganeyd isticmaal ku meelgaar ah, haddii ay leeyihiin awood dhaqaale, amase aaney jirin baahi dan guud oo degdeg ah.
3. Dhulka leh isticmaal ku meel-gaar ah waxaa laga dhisi karaa hoy ka samaysan jiingado, aqal Soomaali, cariish, loox, sarab, iwm.
4. Dhulka leh isticmaal rasmi ah wuxuu noqonayaa dhul leh dhisme ka samaysan gidaar (dhagax, jaajuur, laban, iyo shub iwm) iyadoo la raacayo naqshada dhismaha ee ay oggolaatay Waaxda Naqshadaynta iyo Tayo-Dhawrka ee WHGG&G.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

5. Dhismaha ku tilmaaman farqadda 3-aad ee qodobkan uma baahna in naqshad dhisme loo sameeyo. Haseyeeshe, dhismuhu waa in uu yahay mid waafaqsan naqshada guud ee magaalada iyo maabka xaafadda.

## Qodobka 14-aad
## U-wareejinta Dhulka Dawladda Lahaansho Gaar Ahaaneed

1) Iibka dhulka dawladda waxaa ka mas'uul ah Wasaaradda.
2) Wasaaraddu waxay u maraysaa dhammaan wixii la xiriira wareejinta dhulka dawladda hab waafaqsan hannaanka iibka ee dawladda Puntland.
3) Iyadoo aan wax loo dhimayn habka iibka hantida dawladda, haddii ay lagama maarmaan noqoto waxaa dhulka dawladda loo wareejin karaa lahaansho gaar ah kaliya, iyadoo loo marayo habka soo socda;
   - b) Xaraash furan oo dadwaynaha loogu bandhigo qiimaha suuqa ugu sareeya, oo aan ka yarayn qiimaha suuqa ugu hooseeya.
   - t) Qandaraaska oo la xayaysiiyo.
4) Dhulka ku yaalla goobaha soo socda lama wareejin karo;
   - b) Goobaha leh ahmiyad diineed ama taarikheed.
   - t) Dhulka kaynta iyo beeraha dawladda.
   - j) Dhulka ay maraan Bullaacadaha biyaha, dhulka barkadaha biyaha kaydiya ku yaallaan iyo dhulka lagu ilaaliyo biyaha ku jira dhulka guntiisa.
   - x) Dhulka xeebaha u jira ilaa hal kilo mitir xeebta iyo dhulka uu ku tarmo kalluunku.
   - kh) Goobaha dadwaynuhu ku majo baxsadaan ama ku nastaan, goobaha khatarta leh, waddooyinka dadwaynaha, dugsiyada iyo xarumaha caafimaadka.
   - d) Dhul kasta oo dadwayne oo adeeg siiya bulshada.
   - r) Dhulka xabaalaha noqonaya.
5) Sharciyadda wareejinta dhulka iyo habka loo maray waxaa waqti kasta dib-u-eegis ku samayn karta maxkamadda awoodda u leh.
6) Haddii qiimaha dhulka la wareejinayo (la iibinayo) uu qiima ahaan ka yar yahay $50,000 (konton kun oo doolaar ) waa in la helaa oggolaashaha Golaha Xukuumadda, haddii uu ka badan yahay, waa in la helaa oggolaanshaha Golaha Wakiillada sida ku cad dastuurka dowladda Puntland qodobkiisa 52-aad.
7) Hannaan kasta oo khilaafsan qodobkan looma tixgelinayo mid sharci ah, waxaana laga soo qaadayaa mid aan waxba ka jirin.

## Qodobka 15-aad
## Ilaalinta Dadka Barakacayaasha ah iyo Kuwa Saboolka Ah.

1) Dadka dalka dhexdiisa ku barakacay waxa loola dhaqmayaa sidii kuwa la siman muwaadiniinta kale, waxaana waajib ka saaran yahay dawladda hoose inay u qoondayso dhul la degi karo xilliga barakaca.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

2) Dhul walba oo si wadar ah loogu qoondeeyo inay degaan dadka barakacayaasha ah waxa loo tixgelinayaa mid ku meel gaar ah, waxaana loogu tixgelin karaa mid joogto ah marka la maro habka qoondaynta dhulka ee ku xusan qodobka 13-aad farqadaha 2-aad iyo 3-aad ee xeerkan.
3) Noqoshada, dib-u-celinta, dhexgalka bulshada iyo dib-u-dejinta dadka barakacayaasha waxaa lagu maaraynayaa si taxadar iyo ka fiirsasho sare ku jirto.
4) Dadka dalka gudihiisa ku barakacay waa inaan lagu khasbin inay dib u noqdaan ama dib loo celiyo haddii aanay ahayn;
   b) Sida dantooda ugu wanaagsan ku jirto.
   t) Sida danta dadwaynaha khatartu ka soo wajahday ku jirto.
   j) Sida ay badbaadada ama nidaamka wax yeeloobay ku jiro, ayna ansixiyeen golaha deegaanku.

## Qodobka 16-aad

## Hab-Raaca Dhul Ama Guri Ka Saarista Sharciga Ah.

1) Ka saarista dhulka ama hoyga ee dadka barakacayaasha, dadka danyarta ah ee markaas haysta dhul aan sharciyaysnayn waxaa loo qiil dayi karaa oo kaliya marka la raaco shuruudaha iyo hababka soo socda: -
   b) Marka uu jiro qiil sharci oo lagu caddayn karo qorshe magaalo oo la soo jeediyay ama mashruuc horumarineed oo muhiim ah.
   t) In dadka la siiyo ogaysiis aan ka yarayn soddon (30) maalmood, iyadoo la tixgelinayo duruufo khafiifin ah.
   j) In dadka arrintani saamaynayso lagala yeesho wada-tashi loo dhanyahay tallaabooyinka bedelka ah ee magdhawga lagu siinayo.
   x) In habraacyada sharci ee ku xusan xeerkan iyo xeerarka kale la dhawro.
   kh) In waqtiga lagu guda jiro dhul ka raridda iyo kala guurka, loo helo dadka arrintu saamaysay meel ama dhul bedel ah oo ay ku sii nagaadaan.
   d) In hannaanka ama ujeedka uu noqdo mid aan faquuq ku dhisnayn oo aan si gaar ah loogu beegsan koox ama qabiil gaar ah.
2) In dadka arrintu saamaysay xaq loo siiyo inay racfaan u qaadan karaan maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 17-aad

## Kiraynta Isticmaalka Dhulka Dawladda

1) Iyadoo la adeegsanayo habka qandaraas bixinta dawladda Puntland waxay qof ka kirayn kartaa isticmaalka dhulka dawladda muddo aan ka badnayn konton (50) sano iyadoo la galayo heshiis kiro oo waafaqsan xeerarka khuseeya.
2) Heshiiska kirada dhulka waxaa la siinayaa qofka ku guulaysta qandaraaska, iyadoo ay shardi tahay in;
   b) Qandaraaska dadwaynaha loo soo bandhigay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

t) Habka qandaraasyada la isticmaalay.

j) Kirada, waqtiga bixinta, heshiiska kirada iyo shuruudaha waxaa dejinaya dawladda Puntland iyada oo raacaysa xeerkan iyo xeerka iibka.

x) Marka ay oggolaato dawladda Puntland, kiraystuhu waxa uu sii kirayn karaa ama sii wareejin karaa ka faa'iidaysiga kirada si waafaqsan sharciga, iyada oo sii wareejinta ka faa'iidaysiga dhulka iyo oggolaanshaha lagu ansixinayo heshiis kiro oo markaas cusub.

## Qodobka 18-aad

## Dib-U-Habaynta Dhisme Dawladeed Oo Ku Yaal Dhul Dawladeed Oo Kiraysan.

1) Kiraystuhu wuxuu dumin karaa dhisme ama waxa uu dib-u-habayn ku samaynkaraa dabeecadda dhulka ama dhismaha marka uu oggolaansho rasmi ah ka helo dawladda Puntland, waana in aan dawladdu oggolaan soo jeedinta dib u habaynta dhulka haddii ay:-
   b) Saamayn ku yeelanayso isticmaalka waara ee dhulka.
   t) Saamaynayso nidaamka guud, amniga ama caafimaadka.
   j) Wax ka beddelayso dabeecadda dhulka.
2) Waqti kasta inta aanu dhicin heshiiska kirada, qofka kiro ahaan ku haysta dhul dawladeed waxa uu duminayaa wixii dhisme ah ama wax qaab kale ah ee uu ka taagay dhulka, haddii sidaas si aan ahayn aan dawladdu kula heshiin.

## Qodobka 19-aad

## Shuruudaha Curfiga Ah (Lagu Dhaqmayo) Ee U Dhexeeya Kireeyaha iyo Kiraystaha.

1) Heshiiska kiraynta dhulka dawladda waxaa galaya guddi ka wakiil ah dawladda, waxaana lagu qorayaa diiwaanka Wasaaradda.
2) Kiraynta dhulka dawladda waxaa maamulaya waaxda qorshaynta dhulka magaalooyinka ee Wasaaradda oo ka wakiil ah dowladda.
3) Kirayn kasta oo lagu samaynayo dhulka dawladda;-
   b) Kireeyuhu waxa uu leeyahay awood uu ku kormeero, kuna baaro dhulka la kireeyay, ka dib marka uu ogaysiiyo kiraystaha.
   t) Kiraystuhu waxa uu bisha ugu horaysa sanadka hormarinayaa kirada sannadlaha ah ee ku xusan heshiiska.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 20-aad

## Horumarinta Dhulka Dawladda Ee La Kireeyo.

1) Haddii aan si cad loogu qeexin xeerkan wax ka soo horjeeda kiraynta isticmaalka dhulka dawladda, dhammaan maalgashiga lagu samaynayo dhulka dawladda ee la kiraynayo waxaa;
   b) Loo gudbinayaa dawladda iyadoon magdhaw jirin.
   t) Kiraystuhu waxa uu ka qaadanayaa muddo saddex bilood ah wixii ka yaal dhulka marka la soo afjaro heshiiska, waxaana shardi ah in maalgelintu tahay mid guurto ah ama farsamo ahaan u ah mid guurto ah xilli walba.
2) Haddii heshiiska kiraysiga loo joojiyo sabab la xiriirta ganaax, dawladdu waxay qiima macquul ah kaga iibinaysaa maalgelinta kirayste kale iyadoo goobta uu joogo kiraystaha laga laalay heshiiska.
3) Wixii is-maan dhaaf ah ee la xiriira qiimaha maalgashiga waxaa go'aan ka gaaraya Maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 21-aad

## Ganaaxa Iska Bixin La'aanta Kirada Dhulka.

1) Marka la siiyo ka dib diginiin qoraal oo hal mar ah, dawladdu waxay ka bixi kartaa heshiiska kirada haddii:-

   b) Lacagta kirada ee heshiiska ku qoran aan la bixin bil ka dib markii ay waajibtay iyo bil ka dib markii digniinta kiraystaha la siiyay.
   t) Wixii cashuur ah ee ku waajibta maalgalinta dhismaha ama wixii kale ee muuqda oo meesha laga taagay la bixin waayo muddo laba bilood ah ka dib markii ay waajibtay.
   j) Kiraystaha dhulku ka baaqsado inuu fuliyo shuruudaha la socday heshiiska kirada.
2) Iyadoo aan wax loo dhimayn qodobada ku xusan faqrada 1-aad , Wasaaradda ama dawladda hoose waxay ku dacwoon kartaa bixinta daymaha, biilasha iyo qaamaha ka dhashay kirada dhulka dawladda, taas oo la galay ka hor intii aan la laalin (burin) heshiiska kirada.

## Qodobka 22-aad

## Hannaanka Dhulka Loogu Qoondaynayo Hay'adaha Dawladda

1) Hay'ad kasta oo dawladeed oo codsanaysa dhul ay ugu adeegto danta guud, shaqo qaran, waxay u gudbinaysaa Wasaaradda Hawlaha Guud:-

   b) Codsi qoraal ah.

t) Qorshaha laga damacsan-yahay dhulka.

J) Nooca iyo ujeedka cayiman ee dhulka laga leeyahay.

2) Dhulka danta guud waxaa soo galaya jidadka, buundooyinka, boosteejooyinka basaska, Jardiinooyinka, goobaha deegaan ahaan u nugul ama xasaasiga ah, laymanka isgaarsiinta iyo korontada, xafiisyada iyo xarumaha adeegga dadwaynaha, dhismayaasha dawladda iyo wixii kale ee loo arko mid aan laga maarmin.

3) Shuruudaha ku xusan farqada $1^{\text{-aad}}$, ee xarfaha (T iyo J) ee isla qodobkan waxaa laga soo reebayaa codsiga ka yimaada Dowladda Federaalka.

4) Wasaaraddu, iyadoo heshiis qoraal ah u maraysa, waxay dhul ka qoondaynaysaa diiwaanka dhulka dawladda si ay u siiso hay'adda soo gudbisatay codsiga dhulka, iyadoo ka duulaysa qorshaha iyo nooca mashruuca, waana in mucaamalaadka noocaan ah lagu diiwaan gashaa diiwaanka dhulka ee Wasaaradda.

## Qodobka $23^{\text{-aad}}$

## Habka Lahaanshaha iyo Helidda Dhulka Gaarka Ah.

1) Qofku wuxuu yeelan karaa dhul gaar ah, mid ganacsi ama dhul uu ku helay sabab kale oo sharci ah, dhammaan dhulka bogcadaha ee gaarka loo leeyahay waa in laga diiwaan geliyaa xafiiska dawladda hoose ee degmada.

2) Dhulka magaalooyinka ee gaarka loo leeyahay waxaa lagu mulkiyaa: -

b) Sharciyeynta dawladda hoose ee tuulooyinka iyo degmooyinka dawladda oo dhulka u qoondaysa si waafaqsan xeerkan.

t) Iibsashada dhul magaalo oo si sharci ah u diiwaangashan.

j) Dhul maxkamadi si kama dambays ah qof ugu xukunto.

x) Beer biyoodka iyo beer roobaadka waafaqsan sharciga beeraha ee ay gaadho naqshada guud ee fidinta magaaladu waxaa loo isticmaali karaa jagooyin (Plots), dhul ahaana waxaa iska leh cidii sharciga u lahayd.

kh) Beer kasta oo ka mid ah kuwa ku xusan xarafka (x) oo magaaladu gaadho waxaa dan guud looga jarayaa 30% cabirkeeda guud, waana in lagu muujiyaa naqshada guud.

d) Dhulka oo waqti dheer qof lahaa iyadoon cid shacab ah ama dawlad aanay ka carqaladayn.

r) Barnaamjiyada dib-u-dejinta.

s) Dhulka lagu helo dhaxalka, dardaaranka, siismada ama hibada ama hab kasta oo kale oo sharci ah.

sh) Hab kasta oo kale oo xeer jidaynayo kaas oo waafaqsan xeerkan.

3) Lahaanshaha haysashada dhulku waxay noqonaysaa mid sharcigu si loo siman yahay u aqoonsado, loona fuliyo, waxaana waraaqaha lahaanshaha dhulka lagu soo saarayaa marka la codsado.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 24-aad

## Mudadda Lahaanshaha Dhulka

1) Muddada lahaanshaha dhulku waxay noqonaysaa sida soo socota:
   b) Muwaadinka Soomaaliga ah ee buuxiya shuruudaha ku xusan xeerkan, kana taaga hanti maguurto ah dhulka, lahaanshihiisa dhulka waxa uu noqonayaa mid aan xadidnayn (aan waqti lahayn ).
   t) Iyadoon wax loo dhimayn xeerka jinsiyadda ee heer Federaal, deganaanshaha ama maqaamka qaanuuneed ee ku xusan xeerarka arrimahan khuseeya, qof aan muwaadin Soomaaliyeed ahayn waxa uu yeelan karaa mulkiyadda dhul si la mid ah muwaadinka Soomaaliga ah marka uu buuxiyo shuruudaha ku xusan xeerkan.
   j) Dadka dhulka iska leh waxay helayaan waraaqaha lahaanshaha oo kama dambays ah ka dib marka uu dhismuhu gaaro aasaaska.
2) Isticmaalka dhulka aan loo marin hannaan sharci ah ama aan waafaqsanayn qorshaha magaalada, waxa loo aqoonsanayaa mid aan sharci ahayn.
3) Wixii dukumeentiyo qoran ah ee ay soo saarto dawladda hoose ayna ka mid tahay waraaqaha cashuur ururinta waxay noqonayaan kuwa caddayn ugu filan oggolaanshaha dawladda hoose.

## Qodobka 25-aad

## Ula Wareegidda Jago Dhul Sabab Dan-Guud Ah

1. Duqa Magaaladu marka uu oggolaansho ka helo golaha deegaanka ee degmada iyo Wasaaradda wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro go'aan la wareegid jago dhisan ama mid bannaan oo hore qof loogu siiyay isticmaal gaar ahaaneed.
2. Qofka lagu fuliyo go'aanka kor ku xusan ee faqrada 1-aad wuxuu xaq u leeyahay:
   b) Mag-dhaw u dhigma wixii bogcaddaas uga dhisnaa.
   t) In la siiyo bogcad u dhiganta (Qiimaha iyo cabbirka) bogcadii lagala wareegay.
3. Marka la bixinayo mag-dhaw waxaa la tix-galinayaa dhismuhu inuu yahay mid sharci ah.
4. Dhismaha khillaafsan farqadda 3-aad ee qodobkan waxa loo aqoonsanayaa mid sharci darro ah, qofkuna xaq u yeelan maayo wax mag-dhaw ah waxaana lagu xukumayaa kharashka lagu rarayo.
5. Habka iyo qaabka loo marayo la wareegidda hanti gaar ahaaneed dan-guud awgeed waa in ay waafaqsan tahay xeerarka Dhulka iyo Dastuurka Dawladda Puntland.
6. Hantida loola wareegay dan-guud awgeed, iyadoo la dhawrayo farqada 5-aad ee qodobkan, waxaa loo isticmaalayaa dan-guud oo keli ah, waxaana reebban in loo isticmaalo dan gaar ahaaneed.
7. Qof kasta oo ay saamayn ka soo gaadhay qorshaha la wareegidda oo aan helin mag-dhowga qodobkan uu jidaynayo wuxuu xaq u leeyahay inuu maxkamadda awoodda u leh ka dalbado mag-dhow iyo wax kasta oo ka dhashay waxyeeladii la wareegidda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 26-aad

## Iibka Boos Bannaan

1) Qofka loo siiyey boos isticmaal rasmi ah ee si joogto ah u bixinayay cashuur-sannadeedka ku waajibay wuu iibin karaa, hibayn karaa, wareejin karaa, isticmaali karaa sifo kasta oo sharcigu oggol yahay.
2) Xuquuqda farqada 1-aad ku xusan ma yeelanayaan dadka caadaysta ka ganacsiga dhulka bannaan ee ay soo xaqiijiyeen hay'adaha sharciga iyo dawladda hoose.
3) Haddii qof la siiyay boos ku yaal meel muhiim ah (sida is-goysyada muhiimka ah, ka soo horjeedka jidadka waaweyn) ee aan awoodi karin inuu dhiso, marka Wasaaraddu iyo dawladda hoose isla gartaan in jagadaa banaanaanteedu ku habboonayn bilicda magaalada waxay dawladda hoose kala noqon kartaa warqadda lahaanshaha dhulka, iyagoo ugu badalaya boos ku jira naqshadda magaalada oo munaasib ah.

## Qodobka 27-aad

## Naadada Boos Leh Isticmaal Rasmi Ah

1) Marka la bixinayo boos leh isticmaal rasmi ah waxaa la sameynayaa naado lagu soo saarayo warbaahinta, wargaysyada, idaacadda iyo muuqaal baahiyaha, iyadoo laguna dhejinayo looxa ogeysiiska dawladda hoose.
2) Cid kasta oo dood ama hor istaagid ka qabta bixinta booska waxay la xidhiidhaysaa dawladda hoose ee magaalada muddo dhan (60) maalmood gudahood, laga bilaabo maalinta la naadiyey.

## Qodobka 28-aad

## Diiwangelinta Dhulka

1) Qof kasta oo dhul leh waxaa waajib ku ah inuu diiwangeliyo dhulkiisa isagoo u maraya hannaanka sharcigan.
2) Dawladaha hoose ee magaalooyinku waxay sameynayaan diiwaano lagu qoro noocyada kala duwan ee dhulka iyo dhammaan xeer-nidaamiyayaasha la xiriira dhismaha.
3) Diiwangelinta boosasku waa inay ahaadaan kuwo ku saleysan haysasho dukumantiyada lahaanshaha, warqado caddeynaya lahaanshaha booskaas, xukun maxkamadeed oo caddaynaya lahaanshaha booskaas, waana in lagu xusaa diiwaanka dawladda hoose iyo kan xafiiska waaxda hawlaha guud ee dawladda hoose.
4) Xafiiska naqshadaha ee Wasaaradda Hawlaha Guud wuxuu kaydinayaa waraaqaha boosaska leh isticmaalka rasmiga ah ee la bixiyo.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 29-aad

## Diiwaangelinta Dhulka ee Casriga Ah

1) Warqadda diiwaangelinta iyo codsiga dhulka waxa laga soo rogan karaa bogga elektarooniga ah ama waxaa laga heli karaa xafiiska waaxda awoodda u leh ee dawladda hoose.
2) Marka la hubiyo faah-faahinta warqadda codsiga iyo dukumentiyada la xiriira qofka ay khusayso, waxa dhulka lagu diiwaan gelinayaa maalmo kooban gudahood, taasoo ay ka dhalanayso hab diiwaangelin dhammaystiran iyo sugnaansho lahaansho hantiyeed oo buuxa.

## Qodobka 30-aad

## Badbaadada Dhulka Lagu Diiwaangasho Habka Elektarooniga Ah

Habka diiwaangelinta elektarooniga ah ee dhulku wuxuu leeyahay sugnaansho, kuwa jabsada xog kaydiyaasha (computers) waxba uma dhimi karaan xogta dukumentiga, maadaama aysan heli karin waraaqaha lahaanshaha ee dadku u haystaan dhulka sida wakaaladaha kala wareejinta hantida, heshiisyada dhulka la iibinayo iyo dardaaranka qofka dhintay.

## Qodobka 31-aad

## Habka Qaybinta Dhulka

1) Boosaska dhismaha waxa lagu qaybinayaa hab ku salaysan sinnaan iyo caddaalad iyadoo laga duulayo xaqa sinnaanta muwaadiniinta.
2) Maamulka dawladda hoose marka ay bixinayso boos leh degsiimo isticmaal rasmi ah waxay tix-gelineysa arrimahan soo socda:
   b) In da'da qofka booska soo weydiistay uusan ka yarayn 18 sano.
   t) In uusan lahayn boos kale oo bannaan.
   j) In uu leeyahay awood dhaqaale oo uu ku maamulo kuna dhisi karo booska.
3) Maamulka dawladda hoose iyagoo tixgelinaya duruufo gaar ah oo la soo hubiyey, wuxuu awood u leeyahay in uu dhul siiyo qof ka yar 18 sano.

## Qodobka 32-aad

## Waajibaadka Qofka Boos La Siiyo

1) Qofka la siiyo boos waa inuu shuruudahan buuxiyaa:

b) In uu dhawro sharcigan iyo dhammaan shuruucda kale ee la xiriira maaraynta iyo maamulka dhulka magaalooyinka Puntland.

t) Inuu dhismaha waafajiyo naqshadda guud ee xaafadda uu dhismaha ka dhisayo.

j) Inuu u isticmaalo booska ujeeddada loo siiyey oo keli ah, haddii uusan waaxda naqshadaha dawladda hoose ka helin oggolaansho fasax oo ujeeddadii hore ka beddelaya.

x) Inuu dhismaha bilaabo wakhtiga loo qabtey oo ku cad warqadda dhul-bixinta.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

kh) Qof kasta oo haysta dukumenti lahaansho dhul rasmi ah waa inuu qaato ruqsad oggolaansho dhisme oo uu oggolaanayo maamulka dawladda hoose, isagoo bixinaya dhammaan cashuuraha ku waajibay.

2) Qofka u hoggaansami waaya nidaamka ku xusan faqrada 1-aad ee qodabkan ee lagu soo caddeeyo, wuxuu maamulka dawladaha hoose ka soo saarayaa amar la noqosho boos hore loo siiyey iyadoo aan la siinayn wax mag-dhaw ah.

## Qodobka 33-aad

## Dhisme Sharci Darro Ah

Dhisme kasta oo aan la soo marin habka dhul bixinta leh isticmaal rasmi ah iyo kan leh isticmaal ku meel gaar ah ee ku xusan xeerkan waxaa loo aqoonsanayaa mid sharci darro ah.

## Qodobka 34-aad

## Rarista iyo Duminta Dhisme Sharci Darro ah

1) Maamulka dawladda hoose iyagoo fulinaya qorshaha naqshadda guud ee magaalada wuxuu awood u leeyahay duminta dhismooyinka sharci darrada lagu dhisto, ha ahaado mid rasmi ah ama ku meel-gaar ah.
2) Raridda dhisme ku meel gaar ah waxay ku iman kartaa, raridda xaafad dhan, waxayna dhacaysaa marka loo baahdo ama dhulka xaafaddu uu yahay mid soo galaya ku talo-galka naqshad guud ee loo qorsheeyey arrimo ka duwan degsiimada caadiga ah.
3) Dadka deganaa dhulkaas waa in la dejiyaa meel ku habboon, kharashka raridda iyo dejinta waxaa bixinaysa dawladda hoose.
4) Dhismaha sharci darrada ah ma noqon karo sabab lagu helo boos kale, raristiisana mag-dhaw kama dhalan karto.
5) Dhul bixinta ka dhalata dumin ama rarid dhismooyin kooban ama xaafad dhan meesha la dejinayo waxaa xaq u leh dadka la soo raray oo kaliya.

## Qodobka 35-aad

## Duminta Dhisme Sharci ah

1. Marka loo baahdo in la dumiyo dhisme sharci lagu dhisay iyadoo dib u habayn lagu samaynayo naqshadda guud ee magaalada, xaafadda qofka lihi wuxuu xaq u yeelanayaa;

   b) In la siiyo mag-dhaw u dhigma dhismaha laga dumiyey lagana tirtiro sharcigiisii hore.

   t) In la siiyo boos aan cabbir ahaan ka yarayn kiisii hore ee laga dumiyey looguna sameeyo sharci cusub.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 36-aad

## Joojinta Dhismaha

1) Marka ay jirto sababo garawshiiyo leh, dawladda hoose waxay amri kartaa joojinta dhisme muddo aan ka badneyn soddon (30) cisho.(muddo joojinta dhismuhu kuma jirto muddada loo qabtey inuu qofku ku dhiso booskaas).
2) Dawladda hoose waxay bixin kartaa amarka joojinta dhisme la bilaabey ama socda iyadoo sababtuna tahay dib-habeynta degsiimadaas ama ku xadgudubka waajibaadka qodobka 32-aad ee xeerkan.
3) Qofka dhismahaas laga joojiyey ma sheegan karo wax xuquuq ah oo la xiriirta muddada shaqo joojinta.
4) Faqrada 1-aad ee qodobkan muddada ku cad kuma jiro dhulka lahaanshihiisa muranku ka taagan yahay (dacwadi ka jirto), ilaa ay maxkamaddu go'aan ka gaarto khilaafka.

# CUTUBKA 4-aad

# CASHUURTA DHULKA IYO DAKHLIGA KALE

## Qodobka 37-aad

## Dakhliga Ka Soo Xerooda Tacaamulaadka La Xiriira Dhulka

Haddii aan xeer kale si kale u sheegin, dakhliga ka soo xerooda dhulka waxaa uu noqonayaa;

1) Cashuur sanadeedka hantida.
2) Iibka dhulka iyo cashuurta kala wareejinta.
3) Kirada dhulka dawladda.
4) Khidmadda adeega iyo ujrooyinka.
5) Khidmadda laga qaado ruqsada oggolaanshaha dhismaha maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay.

## Qodobka38-aad

## Cashuur Sannadeedka Hantida

1) Cashuur sannadeedka hantida waxaa ururinaysa dawladda hoose, waxaana la saarayaa dhammaan dhulka diiwaangashan, haddii uu yahay mid la degay ama mid aan la degin, waxaana laga qaadayaa mulkiilaha dhulka sida ku xusan xeerka midaynta cashuuraha dawladaha hoose ee Puntland xeer Lr 4, 2012.
2) Cashuurta waxa lagu salaynayaa mitir laba jibbaaran (meter square) ee dhulka diiwaangashan.

## Qodobka 39-aad

## Iibka Dhulka Iyo Cashuurta Kala Wareejinta

1) Cashuurta kala wareejinta waxaa la saarayaa dhul kasta oo diiwaangashan oo loola kala wareegay iib ahaan, dhaxal ahaan, hibo iyo hab kasta oo kale oo sharci ah, waxaana xafiiska kala wareejinta hantida ee dawladda hoose ku wareejinayaa Wasaaradda Maaliyadda.
2) Sicirka cashuurta kala wareejinta waxaa la saarayaa isugaynta qiimaha dhulka la cashuurayo, waxaana laga tix-raacayaa heshiis nootaayo oo ay soo saarto nootaayo rasmi ah sida ku cad xeerka Nootaaayada Dawladda Puntland.

## Qodobka 40-aad

## Kirada Dhulka Dawladda

1) Kirooyinka lagu bixinayo dhulka dawladda ama heshiisyada kirada ee hantida waxaa qaadaya Wasaaradda Maaliyadda haddii ay tahay hanti hoos timaada maamulka dhexe ee dawladda Puntland, halka ay dawladda hoose qaadayso marka ay tahay hanti ay leedahay D/hoose ee degmooyinka iyo tuulooyinka.
2) Sicirka la bixinayo waxaa lagu jaangoynayaa heshiiska kirada si waafaqsan qodobada heshiisyada kirada ee dawladda.

## Qodobka 41-aad

## Khidmadaha Adeega iyo Ujrooyinka

1) Dawladda hoose waa in aanay qaadin khidmad ama ujro haddii aanu markaas jidaynayn xeer ama xeer nidaamiye la ansixiyay.
2) Cadadka khidmad iyo tabarucaad kasta waxaa jaangoynaya sharciga, waxaana lagu jidaynayaa wareegto ka soo baxda guddiga fulinta ee dawladda hoose, iyadoo ay shardi tahay in cadadku noqdo mid uu awoodo muwaadinka caadiga ah.
3) Cadadka khidmad kasta, dib-u-eegis iyo wax-ka-bedel ayaa lagu samaynayaa labadii sano ee kasta.

## Qodobka 42-aad

## Khidmadda Laga Qaado Ruqsadda Oggolaanshaha Dhismaha Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay

1) Dawladda hoose waxay jaangoynaysaa sicirka khidmadda laga qaadayo ruqsadda oggolaanshaha dhismaha ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo qorshayaasha horumarineed.
2) Khidmadda laga qaado ruqsadda oggolaanshaha waxay qayb ka tahay dakhliga dawladda hoose.

## Qodobka 43-aad

## La Fakashada Cashuurta Dhulka

1) Haddii mulkiilaha dhulka aanu bixin saddex sano oo xiriir ah cashuurta ku waajibtay, ka dib markii la siiyey ogaysiis qoraal ah iyo diginin, dawladda hoose waxay ka dacwaynaysaa maxkamadda si ay ugu sheegato cashuurta.
2) Maxkamaddu waxay go'aan ku soo saaraysaa in:-

   b) Ay siiso mulkiilaha digniin kama dambays ah, waxayna amraysaa in uu soddon (30) maalmood gudahood ku baxsho cashuurta.
   t) Ay amarto in dhulka la iibiyo si loogu baxsho cashuurta ku waajibtay.
   j) Ay ka qaaddo dhulka, iyadoo ka dhigaysa hanti dawladeed.

# CUTUBKA 5-aad

# MAARAYNTA KHILAAFAADKA DHULKA

## Qodobka 44-aad

## Xallinta Khilaafaadka Dhulka

1) Marka ugu horaysa ee uu dhaco khilaaf dhul, dhinacyada ku lugta leh waxay dacwadooda u gudbin karaan guddiga maamul ee xallinta khilaafaadka dhulka ee heer degmo (land dispute resolution tribunal) si ay u xalliso muranka, una soo saarto go'aan maamul.
2) Dhinicii aan ku qancin go'aanka guddiga waxa uu xaq u leeyahay inuu racfaan u qaato maxkamadda sare muddo soddon ( 30 ) maalmood gudahood ah.
3) Ka hor inta aan la tegin kala saarista guddiga, dhinacyadu waxay dooran karaan in khilaafkooda lagu dhammeeyo habka xeer dhaqanka.
4) Guddiga xallinta khilaafaadka waxay tix-gelin siinayaan go'aan kasta ama xaqiiqo raadin kasta oo lagu gaaray habka dhaqanka.
5) Cidii markaas diida inay aqbasho gar-maqalka dhaqanka waxay dacwaddooda ku soo bandhigayaan dhegaysi cusub oo uu gar-wadeen ka yahay guddiga xallinta khilaafaadka dhulka.
6) Xeer-beegtida dhaqanka waxa laga codsan karaa inay yimaadaan gar-qaadka guddiga si ay qayb uga noqdaan dhegaysiga dacwadda.
7) Dadka iyagu u gardhiibta guddiga waxay samaysan karaan qareen u hadla ama iyaga ayaa qareen isu noqon kara oo garta caddaysan kara.
8) Tirada uu ka kooban yahay guddigu, muddada xil-hayntooda, heerka xukunkooda iyo hannaanka lagu soo magacaabayo waxaa qeexi doona xeer nidaamiye gaar ah oo Wasaaradda Arrimaha Gudahu soo saarto.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 45-aad

## Nooca Dacwadda Dhulka

1) Haddii aan markaas dacwadda la xiriirta dhulka aanay lug ku lahayn arrimo la xiriira been abuur dukumintiyo, dhul boob iyo is-hor-taagis nidaamka dawliga ah ee maaraynta dhulka, dhammaan dacwadaha dhulka ee ka dhasha xeerkan waa kuwa madani ah.
2) Maxkamadda degmada waxa ay toos u geli gartaa dacwadaha dhulka ee aan ahayn jagooyinka dhulka bannaan marka muwaadiniinta u soo gudbiyaan cabashadooda.

# CUTUBKA 6-aad

# CIQAABAHA

## Qodobka 46-aad

## Ciqaabaha

1. Qof kasta oo ku xad-gudba sharcigan waxa lagu ganaxayaa ugu yaraan shan (5) milyan Sh. So ama xabsi hal ilaa seddex sanadood ah oo aan saamaxaad lahayn isagoo bixinayaa wixii kharash ah ee dacwadaas dhinaca kale kaga baxay iyadoo aan wax loo dhimayn xeerka ciqaabta guud.
2. Mas'uuliyiinta loo xil-saaray dhul-bixinta ee ku-xad-gudba qodobada sharcigan waxa lagu ciqaabayaa labo ilaa shan sano oo xarig ah oo aan saamaxaad lahayn.
3. Kharashka ka dhasha dacwadahaas waxaa bixinaya xad-gudbaha.

## Qodobka 47-aad

## Dhaqangelinta Xeerka Ciqaabta

Dembiyada ka dhanka ah maareynta iyo isticmaalka dhulka ee ku xusan xeerkan waxa maxkamadda awoodda u leh u cuskanaysaa qodobada khuseeya ee Xeerka Ciqaabka Soomaaliyeed.

## Qodobka 48-aad

## Go'aanka Joojinta Dhismaha Si Ku-Meel-gaar Ah

Inta lagu guda jiro dacwadda muranka dhulka, guddiga xallinta khilaafaadka iyo maxkamaddu waxay leeyihiin awoodda joojinta dhismaha iyo isticmaalka dhulka ilaa go'aan laga gaadhayo.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA · STATE GENERAL SOLICITOR · PUNTLAND · المحامي العام للدولة

## Qodobka 49-aad

## Ciqaabaha Ka Dhalanaya Ku Takrifalka Awoodda

Sarkaal kasta oo dawladeed kaas oo ku-xad-gudba qodobada xeerkan waxaa:-

b) Laga qaadayaa tallaabo anshax marin, haddii markaas falku aanu abuurin mas'uuliyad dembi.

t) Laga qaadayaa tallaabo anshax marin, waxaana loo cuskanayaa sharciga shaqaalaha dawladda iyo dawladda hoose.

j) Uu mutaysanayaa dacwad dembi haddii falku keenayo mas'uuliyad denbi si waafaqsan Xeerka Ciqaabta.

## CUTUBKA 7-aad

## QODOBO QUBANE AH

## Qodobka 50-aad

## Shirkadaha Hantida Maguurtada Ah iyo Dullaalada Iibka Dhulka iyo Kala Wareejinta

1) Qof kasta oo naftiisa matalaya (private person), jooga xafiis qaabilsan hantida maguurtada ah oo ka shaqeeya fududaynta iibka dhulka, kala wareejintiisa, isu keenista iibsadaha iyo iibiyaha dhulka waxaa loogu yeerayaa dullaal sida xeerkan ku xusan.
2) Dullaaliinta dhulka waxaa diiwaangelinaysa oo ruqsad ama shati siinaya dawladda hoose. Sidoo kale Shirkadaha ama xafiisyada hantida maguurtada ah ee ka diiwaangashan Wasaarad kale oo ay khusayso, kuwaas oo fududaynaya iibka dhulka waxaa laga diiwaangelinayaa dawladda hoose.

## Qodobka 51-aad

## Waajibka Ka Saaran Dullaalka Inuu Hubiyo Iibka Dhulka

Shaqada dullaalada dhulka waa inay noqotaa mid nidaamsan oo u hoggaansan arrimaha soo socda:-

1) Dullaaliinta ka hor iibka, waxaa waajib ka saaran yahay inay hubiyaan lahaanshaha dhabta ah ee dhulka iibka lala rabo.
2) Hubinta waxaa ka mid ah inay baaraan cidda dhabta ah ee iska leh dhulka iyaga oo xaqiijinaya waraaqaha, ka hubinaya dawladda hoose iyo hab kasta oo lagama maarmaan u ah hubinta.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

3) Haddii aan dhulka la hubin ama hubintu noqoto mid aan sax ahayn iibka ka dib, dullaalka waxa mas'uuliyad ka saaran tahay khaladka ka dhasha in aanu hubin dhulka, waxaana waajib ku ah inuu bixiyo wixii khasaaro ah ee falkiisa ka dhasha.
4) Haddii uu ku guuldaraysto xallinta arrintaas, waxay ku keenaysaa dullaalka inuu isagu dusha u rito mas'uuliyadda, waxaana la xayiri karaa hantida dullaalka ilaa inta laga xallinayo arrinta.

## Qodobka 52-aad

## Nootaayooyinka Dadwaynaha Ee Ka Shaqeeya Tacaamulaadka Dhulka

1) Nootaayada dadwaynaha waxaa waajib ku ah inay dammiinul-maal ku xirtaa tacaamulaadka dhulka.
2) Qofka dammaanadda qaadaya waxa uu noqonayaa dammiinul-maal khilaaf kasta oo ka yimaada lahaanshaha dhulka.
3) Ka dhaafidda mas'uuliyadda ee dammiinul maalka waxaa macneheedu noqonayaa in Nootaayadu tahay midda dusha u ridanaysa dammaanad qaadista wixii khilaaf ama is qabsi ah ee ka yimaada lahaanshaha dhulka.

## Qodobka 53-aad

## Waajibaadka Dammiinul-Maalka Dhulka La Isku Qabsado

Dammiinul-maal kasta oo ay dhulkii uu dammiintay ka dhalato dood sharci oo la xiriirta lahaanshaha, sidaasna aan lagu wareejin karin dhulka, maadaama aan hubin ku habboon la samayn ama uu gabood-falku ka yimid dhanka dammiinul-maalka, waxaa dhulka dib u celinaya dammiinulmaalka.

## Qodobka 54-aad

## Soo Saarista Xeer-Nidaamiyeyaal

1. Wasiirku waxa uu soo saari karaa isagoo la tashanaya degmooyinka iyo hay'adaha kale ee ay khusayso, xeer-nidaamiyaal lagu fulinayo xeerkan oo la xiriira;
   b) Arrin kasta oo uu sharcigan oggolaaday in xeer-nidaamiye loo sameeyo.
   t) Hirgelinta iyo fulinta waaxyaha ay khusayso ee hay'adaha dawladdu u dhaqan galinayaan xeerkan.
   j) Wixii kale ee lagama maarmaan ah ama hab loo dejiyo si loogu guuleysto sarena loogu qaado ujeeddooyinka Xeerkan.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 55-aad

## Burin

1. Xeerkani wuxuu burinayaa xeer kasta oo la xiriira maaraynta dhulka magaalooyinka oo ka hor imanaya qodobada ku xusan Xeerkan.
2. Qodobada ku xusan xeerka ciqaabta guud, habka ciqaabta, xeerka madaniga iyo habraaciisa iyo dhammaan xeerarka kale ee xiriirka la leh kuwaas oo aan ka hor imaanayn qodobada xeerkan waa lagu dhaqmayaa marka la fulinayo Xeerkan.

## Qodobka 56-aad

## Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة